

**WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA
SARE**

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2018

AF-SOOMAALI



XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

**WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE
XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND**

Code Number

**Imtixaanka Fasalka 4aad 2018
Amin 2 Saac iyo 10 Daqiiqo Akhris ah**

AF-SOOMAALI

TILMAAMAHA IMTIXAANKA

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 11 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Haku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imtixaanka
- Hubi in waraaqda lifaaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:

QAYBTA	DHIBCAHA
Qaybta 1aad : Sheeko	20 dhibcood
Qaybta 2aad: Suugaan	25 dhibcood
Qaybta 3aad : Naxwe	21 dhibcood
Qaybta 4aad: Hiddaha iyo dhaqanka	27 dhibcood
Qaybta 5aad: Curis	07 dhibcood
Wadarta: 100 Dhibcood	

Waxaa iska leh saxaha

QAYBAHA	DHIBCO
QAYBTA 1AAD	
QAYBTA 2AAD	
QAYBTA 3AAD	
QAYBTA 4AAD	
QAYBTA 5AAD	
WADAR	



SOM EXAMS

QAYBTA 1AAD: SHEEKO -----20 DHIBCOOD**Akhri sheekadan, dabadeedna ka warceli weydiimaha kaaga imandoona**

Waa sannad barwaaqo ah oo uu toddobku si fiican u hooray, seermaweydaduna ay galgaal-baxday. Geelle waxa uu geela uga xero dhigay, dooxooyinka buuraha salkooda dhaca ee carro sanko ah. Xerada waxaa ku hareeraysan dhir geed hoose iyo mid sareba isku dhoon noqotay. Waxaa dooxada laga maqlayaa codadka kala duwan ee shinbiraha, baarqabka gulgulada tuuraya dhebidana sayrinaya iyo raha xareedda iyo barwaaqada ku damaashaadaya.

Waxa kale oo aan marnaba isha laga gooynta karayn, rimayda goojineysa, midda saddexa maran ee niriqtu naaskeeda ka haagtay, ramagga dhalay oo niriqaha loo tiicinayo, abeerka farowgu goobay iyo galaxa caana ah ee haruubada ku qotoma.

Geelle markii uu salaaddi subax tukadey ayuu xerada eegay, waxa ayna indhihiisu qabteen maandeeq oo xalay xerada dhexdeeda niriq ku dhashay; dabadeedna niriqtii ayuu dibadda ugu soo saaray una axal duugey, geelii kalena oodda ayuu ku adkeeyey, wuxuuna u cid dirsaday beeshii dooxadda taalley. Markii la arkay Geelle oo milicda isu dhigaya ayaa la gartay in uu geelisi saaka boqol gaarey. Markaas ayaa sidii boqor la caleemo saarayo salaam lagu boobay. Waxaana lagu yiri: "geel badane lagu sheeg".

Geelle mar haddii uu geeliisi boqol gaarey, waxa gashay hindise guur; waayo horay ayaa looyiri:

- » Hanka duniyadeed waa intaad, gelinba haaysaaye
- » Hal haddii aad leedahay labaad, ku hindisootaaye
- » Hirkii kaa dhammaadaa midbuu, kaa hor bixiyaaye

Subaxdaas waxaa geelle maskaxdiisa ku soo dhacday hees carruureed uu hooyadiis ka maqli jirey markii uu yaraa, taas soo ahayd:

- » Haddaad gaban yohow barbaarto
- » Haddey geeridu ku deyso
- » Haddii geeleenu gaasmo (bato)
- » Haddaad guur haamineyso
- » Marnaba goonbaar ha guursan

Haddaba Geelle waxa uu go'aansaday in uu haasaawe tago oo uu beesha dhex maro si dardaarankii hoyadiis uu u fuliyo. Waxa uuna noqday guurmeer godanta(dooxada) caan ka ah.

Maalintii dambe ayuu goor gabbal dhac ah la kulmay gabar awr dabar ka fureysa, si ay u soo carraabiso. Gabadhii inta ay ku naxday oo si fiican u hagoogatey ayey ka jeensatey, bariidadiina waa ay ka qaadday.



Waxaa markiiba Geelle dareenkiisii beddeley xishoodka iyo quruxda Bilan uu eebbe ku manaystey, gaar haan: dhexda madagta ah, sanqaroorka toosan, cirridka dhuxusha ah iyo suuniyada timuhu ku qarooraan.

Waxaa Geelle iyo Bilan dhexmaray isbarasho aan si fiican loo kala bogan, Bilan waxa ay carraabisay awrtii, geellena waxaa uu goobta ka tegey isaga oo dhaqaaq joogsanaya, qalbigiisana ay mawjado jacayl ahi is dhaafayaan.

Geelle markii uu Bilan uga warramay adeerkiis Geeldoon, waxaa uu ku yiri: "Adeer gabar kasta oo qurux iyo qiimo leh nin geel haysta waxba kuma aha ee niyadda khayr u sheeg" waana tii uu gabyaagu yiri:

- » Naagaha middii quruxsanoo, qaali lagu sheego
- » Amuu aabbeheed qarín jiroo, qoolad lagu oodo
- » Sahal buu u qaataa ninkii, qaalmo bixiyaaye

Subaxdiiba waxaa la guda galay qorshaynta raggii gabadha dooni lahaa, maalintii labaadna waxaa la ardaa dhigay Bilan, waana lagu heshiiyey guurkeeda; waxaana la isku daray gabbaatigii iyo yaradkii oo noqday konton halaad.

a. Goobo geli jawaabta saxda ah..... 07 dhibcood

1. Seermaweydo iyo toddob waxa ay ada'aan xilliga:

a. Gu'ga	c. Diraacda
b. Dayrta	d. Xagaaga
2. Geelle waxa uu geeliisa uga xero dhigay meel:

a. Buur ah	c. Hawd ah
b. Dooxo ah	d. Hogob ah
3. Hashu marka ay saynta kor u taagto, waa astaan lagu garto in ay:

a. Galoof tahay	c. Irmaan tahay
b. Riman tahay	d. Badho tahay
4. Awrka geela ku qooqan waxaa la yiraahdaa:

a. Baarqab	c. Qaalin
b. Qurbac	d. Qooddi
5. Awrka qooqani kaadida uu miskaha iskala dhoco, waxaa la yiraahdaa:

a. Habeed	c. Dawaad
b. Dhebi	d. Shuruf
6. Nirigtii ayaa hal naas ka haagtay waxaa looga jeedaa:

a. Ka dheregtey	c. Ku naaxday
b. Ku qadday	d. Ku daabatay



7. Geelle waxaa salaanta loogu boobay geelii ayaa:

- a. Boqol gaarey
b. Beesha deeqay

- c. Buux-dhaafay
d. Bawdka jabshey

b. Sheeg macnaha erayadan sheekada laga soo xulay.....05 dhibcood

1. Waa isku dhoon _____

2. Farowgu goobay _____

3. Dhaqaaq joogsi _____

4. Galgaal bax _____

5. Axal ka duug _____

c. Ka jawaab su'aalahan soo socda..... 08 dhibcood

1. Maxaa geelle ku kallifay in uu milicda fariisto? _____
2. Gabdhaha Soomaaliyeed guurkoodu waa uu adkaa, haddaba maxaa Geelle u fududeeyey guurka Bilan? _____
3. Muxuu geelle ku doortay gabadha uu guursadey? _____
4. Xoolaha ugu horreeya ee gabar laga bixiyo maxaa Soomaalidu u taqaan? _____

QAYBTA 2AAD: SUUGAAN..... 25 dhibcood

a. **Gabay:** Gabaygan waxaa tiriyey C/dulle Raage 1972dii, maalintii la soo bandhigay qoraalka Far-soomaaliga, usagoo u la jeeday muujinta qaybaha afka iyo fariihii qalaad oo meesha si fudud uga baxay.

1. Labaatan iyo labo aamustiyo, shaqal irmaaneeya.
2. Amraniyo tilmaamiyo gudbiyo, aade iyo jooge
3. Isku dare xiriirshiyo falkaab, erayadeennii ah.
4. Ebyaniyo haddaan magac u yaal, ku arkay joornaalka
5. Mar haddii afkaygii la qoray, aabbe iyo hooyo
6. Mar haddaan amaahsigii ka baxay, lagu agoomoobey
7. Abaal waxa leh nimankii fartaa, soo abaabulaye
8. Amiirnimo sin iyo garab jirteey, nagu abuureene
9. Afafkaa qalaad iyo maxaa, eregta noo keenay

Ka warceli weydiimaha kaaga iman doona gabayga ah..... 10 dhibcood

1. Muxuu abwaanku uga jeedaa labaan iyo labo aamusta?

2. Tuducee ayuu ku tilmaamayaa falalka Afka Soomaaliga?

3. Muxuu ugu jeedaa abwaanku amaahsiga lagu agoomoobey?

4. Muxuu abwaanku ka wadaa? (afafka qalaad iyo maxaa eregta nookeenay)


5. Waa maxay u jeedka uu gabaygani xanbaarsan yahay?

b. Hees hawleedyo10 dhibcood

Isku aaddi hees hawleedda iyo waxa loogu heeso, adiga oo adeegsanaya erayada shaxda ku jira.

Kebedda	Geela	Lo'da	Fardaha	Haanta	Salsalka
Maqasha	Xijiga	Kalluunka	Dameeraha	Idaha	Soohidda

- _____ Beyga dhalayoow, baaqin maahide, barqo soo noqo.
- _____ Afartii lagu tolay, yaad uga tegeysaa, oo kaaga toolmoon.
- _____ Sange weligiis, lug sakalayoo, saddex ku ciyaar, oo sinaha dadab.
- _____ Sabaan ari go'ay, sacna weyl gabay, suubeey lagu sidig.
- _____ Geedba geedka u dheer laga garaacyeey, galool mudhay mayraxdiisaay.
- _____ Ma fiyoobidoo ku arkay, xarigiina lama furine, ma furtaa lagaa dhuugey.
- _____ Mingaafkiyo malawidiyo, maryaha noocaan jeclaa, ayaan moolaaliyaa.
- _____ Gaxashoow gadiir, goon buuxiyoow, gu'samaadayoow, geel iiga roon.
- _____ Qudhuba qadhabo, qoobab dhagaxeey, awrka qululka leh, qiimo dheereey.
- _____ Deylooy duqeey, dedebkaa nin cunay, dadba maw egyahay.



c. Min hal maahmaah ka qor kuwan soo socda..... 05 dhibcood

1. Libaaxa _____
2. Midhaha _____
3. Midnimada _____
4. Nabadda _____
5. Shinbiraha _____

QAYBTA 3AAD: NAXWE21 dhibcood**a. Ka soo saar midka saxda ah, kuna qor meesha loo banneeyey..... 08 dhibcood**

1. Oday iyo habar baa is arkay. *Ka soo saar magac u yaalka noqod* _____
2. Anigu waan waan tegayaa adiguna tag. *Ka soo saar xiriiriyaha* _____
3. Wiilku hal buu eryoodey. *Ka soo saar fal gudbaha ku jira* _____
4. Shalay waa la I sharfay. *Ka soo saar magac u yaalka dhiman* _____
5. Si aad ah u akhri casharka. *Ka soo saar falkaab siyeedka* _____
6. Hordhac ayuu baru nasiyey. *Ka soo saar magaca lammaan.* _____
7. Hasha ayaa dhashay ilmaha. *Ka soo saar qodobka ku jira* _____
8. Kaasi waa abti saalax. *Ka soo saar tilmaanta* _____

b. Goobo geli jawaabta saxda ah..... 05 dhibcood

1. Magac u yaaladan keebaa ah magac u yaal ebyoon

a. Aniga	c. Kayga
b. Kuwan	d. Is
2. Erayadan kuma ayaa fal ah

a. Bare	c. Bar
b. Barte	d. Bire



3. Magaca guud ee ku jiraa waa kuma?

a. Dhirta

c. Quraca

b. Badda

d. Inanka

4. Xiriiraha ku jiraa weedhan waa (dadkuna waa uu hodmay)

a. "ay"

c. "hod"

b. "na"

d. "waa"

5. Magaca Af-carbeedka ka yimi, marka la wadaraynayo waxa gadaal ka raaca.

a. "mo"

c. "yaal"

b. "iin"

d. "a"

c. Sheeg kuwan soo socda shaqooyinka ay qabtaan..... 08 dhibcood

a. Falkaabka

b. Magac u yaalka

c. Qodobka

d. Meeleeyaha

QAYBTA 4AAD: HIDDAHA IYO DHAQANKA.....27 DHIBCOOD

a. Goobo geli jawaabta saxda ah..... 10 dhibcood

1. Shinbirta fiinta layiraahdo ci'deeda waxaa lagu saadaaliyaa

a. Nabadda

c. Colaadda

b. Barwaaqada

d. Roobka

2. Midabadan fardaha kan loogu jecel yahay waa

a. Ashkirka

c. Xamarka

b. Baroorka

d. Qaajaha



3. Meesha xabagta faleenka lagu kaydiyo waxaa la yiraahdaa
- a. Malawi
 - b. Muudi
 - c. Mingaaf
 - d. Masarafad
4. Ninka doonyaha sameeya waxaa la yiraahdaa
- a. Mooli
 - b. Muuli
 - c. Muurre
 - d. Mufti
5. Kuwan midkood ayaa ah dhiciska geela
- a. Mutullux
 - b. Bucle
 - c. Afkuxuuble
 - d. Dulkumalable
6. Waranka warmaha ugu weyn waxaa layiraahdaa
- a. Taraawil
 - b. Kaal
 - c. Golxob
 - d. Murjis
7. Marka weer lagu daro weer kale waxaa soo baxa
- a. Eray
 - b. Hakis
 - c. Hojis
 - d. Tuduc
8. Xanuunka ku dhaca maqasha xoolaha, marka ay caanaha is ka badiyaan waa
- a. Daab
 - b. Daad
 - c. Cashi
 - d. Ceshi
9. Biciidka dhaddig waxaa loo yaqaan
- a. Daraad
 - b. Warrad
 - c. Gosol
 - d. Adeeri
10. Geedka abeesada dila ee dalkeenna ka baxa, waxaa layiraahdaa
- a. Maqaari
 - b. Majaari
 - c. Mooli
 - d. Marooro



b. Erayo dhaqameedkan mid walba kan la mcanaha ku buuxi..... 05 dhibcood

Bidaar	Bakhayl	Fuley	Badho	Cayr	Dhallaan
--------	---------	-------	-------	------	----------

1. Giiryaale _____
2. Dhabcaal _____
3. Hiiro _____
4. Baaqimo _____
5. Gurbood _____

c. Shinbirahan u kala sooc hilib cunayaal iyo mira cunayaal..... 04 dhibcood

Qoolley Galaydh Digiran Deynihilato Gorgor Muurro Coomaade Baqalye

1. Hilibka _____
2. Midhaha _____

d. Ka warceli dhammaan weydiimahan soo socda..... 08 dhibcood

1. Sheeg magaca loo yaqaan neefka lo'da ah ee qaarka hore madow?

2. Waa kuma xayawaanka la dhaqdo ee uu codkiisu dannaaniga yahay?

3. Maxaa la isku yiraahdaa gammaanka iyo lo'da?

4. Magacee loo yaqaan Alle bariga ay hooyada uurka lihi samaysato marka uu sidkeedu soo dhowaado?

5. Ugaadhu waxa ay u kala baxdaa waaweyn iyo yar-yar, haddaba magacee loogu yeeraa nooca yar-yar?



6. Marka ugu horraysa ee ay xooluhu biyaha cabbaan waxaa la yiraahdaa kamiin, haddaba maxaa loo yaqaan, marka xoolaha cabbaar ka dib biyaha dib loogu soo celiyo?

7. Qoor-jabanle waa nooc ka mid ah dhiciska xoolaha, haddaba sheeg meesiga iska leh?

QAYBTA 5AAD: CURIS..... 07 DHIBCOOD

Waxyaabaha curiskaaga laga saxayo waxaa ka mid ah:

- Qurxinta iyo habaynta curiska.
- Dhadhanka iyo dhismaha weeraha.
- Si habboon isugu xirnaanta qoraalka.
- Adeegsiga astooyinka qoraalka, sida (, ; . : ? " " ! / -)
- U isticmaalka qoraalkaaga: erayo culus, maahmaahyo iyo suugaan.
- Qoraal ka kooban qaybahan: Arar, Duluc iyo gunaanad.

Ciwaanadan midkood dooro, dabadeedna ka qor qoraal aan ka yarayn 15 sadar

- Farqiga u dhexeeya hab-dhaqanka qof wax bartay iyo mid aan waxba baran.
- Waajibaadka kaa saaran deegaanka aad ku nooshahay.



